



# Takoorida - Midabka

## Discrimination - Race

**Takooridu waa ula dhaqanka qofka si aan sinaan ahayn ama aanu qofku raali ka ahayn taas oo la xiriirta abuurista qofka. Fiktooriya waa sharci daro in lagu takooro qof midabkiisa.**

### Waa maxay sinjigu (Race)?

Sinjiga wax ka mid ah midabka, tafiirta qofka, wadanka, isirka, halka uu ka soo jeedo qofku, ama astaamo gaar ah oo la xiriira sinjiga qola gaara.

### Tusaale

(Jaamac warfaa) oo ku guulaysan waayey shaqo uu ka codasaday shirkada dhismaha. Markii uu telefoon ku weydiiyey shirkadii sababta shaqada uu u heli waayey, (Jaamac warfaa) waxa loo sheegay: "Waxaanu hore u shaqaalaynay dad aad isku wadan ka timaadeen. Markaas nalama qeybsan kartaan anshaxa shaqadayada. Mana doonayno inaan mar kale qalad galno."

### Halkee buu ka dhacaa midab takoorku?

Sharcigu wuxuu khuseeyaa hab dhaqanka dadweynaha, ee ma khuseeyo hab dhaqanka gaarka ah. Taas macnaheedu waxa weeye waa sharci daro marka uu midab takoorku ka dhaco goobta shaqada, guriyeynta, kalaabyada, waxbarashada, wax-kalagadasho iyo adeegyada, ciyaaraha iyo iibka ama wareejinta dhulka.

### Tusaale:

(Jaamac Warfaa iyo Xaawo Luul) oo (asalkoodii Soomali ahaa). Markii ay telefoon u direen xanaanaynta caruurta ee xaafadooda si ay ilmahooda meel ugu helaan (Jaamac Warfaa), waxa loo sheegay "Haa, meelo badan ayaa ka banaan." Laakiin (Xaawo Luul) Markay (Xirsi yare) geysay xanaanadii, wuxuu maamulihii u sheegay inay ilmaheeda geysa meel kale oo ku haboon.

### Waxa ka reeban

Takoorista waa loo ogolyahay dadyow gaarka ah mararka qaarkood. Tusaale ahaan dadka u dhashay Yukarayn wey diidi karaan in dad kale la soo galaan meesha dadkooda waaweyn lagu daryeelo; Ururka Celtigu wuxuu adkayn karaan ka soo qeybgalka ururkooda. Ururka daryeelka Japaaniisku wuxuu adkayn karaa shaqaalaynta cid kale oo aan Japaniis ahayn.

Wuxuu shaqaaleeyuhu shaqaylaysiin karaa qolo gaar ah haddi ay muhiim u tahay Farshaxanka, Madadaalada, sawirka, ama shaqooyinka is muujinta (modelling).

### Sidee Guddiga Xuquuqda Aadanaha iyo U-sinaanta Fursada Fiktooriya ku caawin karaan?

Waxaanu caawinaa dadku inay xalistaan takoorida annagoo siinayna dacwooyinka la xiriira adeeg aan dhinacna jirin oo wax lagu xalinayo kaas oo lacag laa'an ah qarsoodina ah iyadoo ujeedadeedu tahay in heshiis laba dhinaca la gaaro. Wac Guddiga weydiina mutarjum lacag laa'ana haddii aad mid u baahan tahay.

**Khadka Talada (03) 9281 7100**

**LACAG LA'AAN (wacayaasha dibada)**

**1800 134 142**

**TTY: (03) 9281 7110**

**Email: [complaints@veohrc.vic.gov.au](mailto:complaints@veohrc.vic.gov.au)**

Turjubaana lacag laa'ana ayaa codsi lagu helli karaa.

**AFEEF:** macluumaadkan waxaa looga jeedaa inuu ahaado tuse keliya. Maaha wax bedelaya adeega sharciga.

**BARAYFASIGAAGA:** VEO&HRC waxay raacaan qaanuunka barayfasiga Fiktooriya iyo shuruudaha waxyaallaha sirta ah ee Xeerka U-sinaanta Fursadaha ee 1995. Nadaamkayaga waxaa laga helli karaa online-ka [www.humanrightscsmission.vic.gov.au/privacy](http://www.humanrightscsmission.vic.gov.au/privacy) adigoo la xiriiraya Guddiga. Waxaa ansixiyey Guddiga Xuquuqda Aadanaha iyo U-sinaanta Fursadaha, 3/380 Lonsdale St, Melbourne, Victoria, 3000

April 2007